



**Jooji Cunsuriyada fayraska Korona,
Kula dagaal Cabsida iyo Warbixinta qaldan Xaqiiqaha**

Waxaa jiro warbixino soo kordhayo oo caalamka oo dhan ah oo sheegayo inay jiraan weeraro jireed iyo kuwa hadal ah oo la xiriira fayraska korona oo loo geysanayo shaqsiyaadka loo arko inay kasoo jeedaan Aasiya. Waa inaan dhammaanteen si firfircoon u wada shaqeynaa si aan u joojino faafida weeraradaan cunsuriyadeed inagoo xaqiijinayno inaan si wadajir ah kula dagaalanno cabsida iyo warbixinta qaldan xaqiiqaha. Fayraska korona waxaa kowdii laga ogaaday Shiinaha oo waxaa tan iyo markaas laga helay ku dhawaad 70 aagag caalamka, oo ay ku jirto Mareykanka. Cabsida iyo walwalka waxay aasaasi karaan dhaleeceyn markay dadka qiyaasaan in koox dad ah aad ugu dhow yihiin inuu ku dhaco ama faafiyaan fayraska.

Fayrasyada ma takooraan mana saari karaan diirada bulsho gaar ah, jinsiyada ama taariqa jinsiyadeed. Dadka waxaa kaliya uu ku dhici karaa ama ay faafin karaan fayraska haddii ay u safreen aag qaadsan ama ay xiriir dhow la yeeshaan qof qaba fayraska. Tani waa run kumana xirno jinsiga ama jinsiyada qofka.

Hel macluumaad adiga oo booqanayo [Websaydka Fayraska korona ee OHA](#) ama [Websaydka CDC](#) si aad u heshid warbixinta caalamka. Caawi la dagaalanka cunsuriyada iyo warbixinta qaldan adiga oo dadka u sheegayo websaydka OHA ama CDC. U soo sheeg falalka dambiga naceybka [Waaxda Cadaalada Oregon](#) adiga oo soo wacayo 844-924-2427 ama 844-924-BIAS.

Cunsuriyada lagama aqbali karo bulshadeena. Inta lagu jiro waqtiyada adag, waa inaan is ixtiraamnaa oo aan helnaa macluumaad si aan uga fogaano abuurida cabsi aan muhiim aheyn.

Qadadka iyo illaha kale ee cunsuriyada la xiriirta fayraska korona

Maamulka Caafimaadka Oregon, “COVID-19: Ka baro Xaqiiqaha” fiidiyaha:
www.youtube.com/watch?v=jePXCdb5jmU#action=share

Maamulka Caafimaadka Oregon, Xaashida “Fayrasyada Ma Takooraan. Inaguna Waa Inaanan”:

Healthoregon.org/coronavirus

Xaquuqda fasaxa jirada:

www.oregon.gov/boli/TA/Pages/T_FAQ_OregonSickTime.aspx

U soo sheeg dambiga eexashada Waaxda Cadaalada ee Oregon:

www.doj.state.or.us/oregon-department-of-justice/bias-crimes/about-the-law/

Midowga Portland oo Ka Hortagayo Naceybka:

<https://sites.google.com/view/portland-tracks-hate/home>

Waxaad ku heli kartaa dokumentigan luuqado kale, far waawayn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidayso. Kala xiriir Allison Varga 971-673-1283 ama Allison.varga@dhsoha.state.or.us, ama soo garaac 711.